Naturbruksprogrammet

2013-09-18

# Barnaamujka dhowrista deegaanka

SOMALISKA

Utbildningsinfo

Skolverket

**Barnaamujka dhowrista deegaanka waa barnaamuj xirfadeed oo lagu qaadanaayo shahaado xirfadeed.**

Barnaamujka dhowrista deegaank wuxuu ku habboonyahay qofkii rabo in uu ka shaqeeyo dhir, xayawaan, dhul, biyo ama duur.

Shaqada waxaad bilaabi kartaa toos marka aad waxbarashada dhameysid ama waxaad aadi kartaa jaamacadda xirfadaha, oo waxbarashadaada ku sii wada kartaa. Waxaa kale aad doorankartaa in aad koorsooyin dheeraad ah akhrisatid si aad jaamacadda u aadid.

## AFAR JIHO OO KALA DUWAN

**Xayawaan**

- Waxaad wax ka baraneysaa xayawaanka, dabeecadda xayawaanka iyo ciyaar wadaaga xayawaanka iyo bani aadamka. Jihadu waxa ay ku siineysaa fursad aad uga shaqeysid shaqo oo tusaale ahaan ah shaqada eyga, xannaaneeyaha xayawaanka xagga beeraha, daryeelaha xayawaanka iyo xannaaneeyaha farasta iyada oo jihadu markaas tahay faras fuulista ama kadlaynta.

**Beeraha**

- Waxaad wax ka baran doontaa dhulka, biyaha, dhir, xayawaan, dhaqaale iyo farsamo, soo saaridda shaqooyinka iyo qiimaha ay beerahu u leeyihiin horumarka baadiyaha. Jihadu waxa ay ku siineysaa fursad aad uga shaqeysid shaqo oo tusaale ahaan ah shaqooyinka baadiyaha, beeraha oo jihadeedu tahay mashiinka, xayawaanka iyo abuuridda dhirta.

**Duur**

- Waxaad wax ka baran doontaa duurka oo nuuc khayraad raagaayo ah, sidoo kale waxaad si qoto dheer ah u dhex geli doontaa cilmiga aad ka leedahay farsamaha iyo baayoolaji. Jihadu waxa ay ku siineysaa fursad aad uga shaqeysid shaqo oo tusaale ahaan ah ugaadhsi iyo ka shaqeynta xayawaanka duur joogtada ah, hoggaaminta dabiiciga ah, darawalka mashiinka duurka iyo daryeelaha duurka.

**Beerta nasashada**

- Waxaad wax ka baran doontaa dhulka, dhirta, deegaanka dhirta iyo beerta nasashada qiimaha ay u leedahay mujtamaca. Sidoo kale waxaad wax ka baran doontaa baayoolajiga, farsamaha iyo dhaqaalaha. Jihadu waxa ay ku siineysaa fursad aad uga shaqeysid shaqo oo tusaale ahaan ah daryeelidda deegaanka bannaanka ah, dhisaha beeraha nasashada, abuuridda beeraha nasashada marka laga hadlo beeraha goonida ah ama guriga dhirta lagu dhex kobciyo.

## Waxaan baad barnaamujka ku baran doontaa

Waxaad horumarin doontaa cilmiga aad ka leedahay deegaanka. Fahan weyn baad ka yeelan doontaa deegaanka faraha badan iyo sida ay meherada kala duwan raad ugu yeelaan deegaanka. Sidoo kale waxaad baran doontaa baayoolaji, cilmiga noolaha iyo deegaanka, farsamaha iyo dhaqaalaha.

Barnaamujka waxaa miisaanka la saarayaa su'aalaha ku saabsan deegaanka shaqada si ooga hortago dhaawacyada shaqada iyo si loo dhiso caafimaad fiican.

## Sidaan buu barnaamijku u diyaarsanyahay

Barnaamijka xirfadeed maadooyinka dugsiga sare oo wadajirka loo leeyahay waa: ingiriis, taariikh, ciyaaraha- iyo caafimaadka, xisaabta, cilmiga sayniska, cilmiga diiniga, cilmiga barashada mujtamaca, iswiidhishka ama iswiidhishka oo luuqadda labaad ah. barnaamijka xirfadeed waxaad akhrisan doontaa maadooyin xirfadeed oo badan, oo loo yaqaano maadooyinka sifooyinka, iyo maadooyinka aad ku soo dhigatay dugsiga aasaasiga ah oo yaraaday.

Maadooyinka sifooyinka wadajirka loo leeyahay ee barnaamijka waa: baayoolaji, qandaraasid iyo dhowrista deegaanka.

Waxaad fursad u helaysaa in aad ku takhasustid oo aad cilmi dheeraad ah u yeelatid barnaamijka. Waxaa taas la dhahaa si qoto dheer ah barnaamijka loo galo. Iskoolka ka wareyso maadooyinka si qoto dheer ah loo sii galayo oo ay soo bandhigayaan.

Sidoo kale waxaad leedahay doorasho gaar ahaaneed oo aad dooran kartid waxa aad akhrisaneysid. Iskoolka weydii koorsooyinka ay heystaan.

## Habka shaqada

Barnaamujka waxaad ku hibbin doontaa oo aad ka fikiri doontaa hab dhaleeceyn badan si aad u dhowri kartid deegaanka uuna u raago. Waxaad ka ambaqaadeysaa dhibaatooyin kala duwan oo qwaaqici ah, oo aad dhibaatooyinkaas la xallineysid dad kale ama keligaa. Waxaad tabo bareysaa awoodaada wax bilaabidda, horumarinta natiijooyin cusub iyo wax soo saaridda, sidoo kale waxaad bran doontaa sida shirkad gooni ah loo wado. Waxaad baraneysaa qorsheynta iyo guda gelinta hawlaha shaqada yio markaas qiimeynta natiijada.

## Shaqada dugsiga sare

Dhamaadka barnaamujka dhowrista deegaanka waxaad suubineysaa shaqada dugsiga sare oo waxaad ku suubineysaa goobta xirfadeed aad dooratay. Markaas waxaad muujineysaa in aad heshay cilmiga loo baahanyahay si loo bilaabo in lagu shaqeysto waxa aad baratay.

## Shaqo gacmeed

Qeybab waxbarashada ka mid ah waxaa la dhigan doonaa ugu yaraan 15 isbuuc waxaana lagu dhiganan doonaa hal goob oo shaqo ama goobab badan oo shaqo, waxaana la dhahaa tababarka shaqada (apl). Waana qeyb muhiim ah oo ka mid ah waxbarashada. Apl wuxuu ku siinayaa waayo aragnimo iyo xidhiidhyo oo aad ka faa'iideysan kartid marka aad shaqo raadsaneysid.

## Waxbarashada tababartaha

Barnaamujka dhexdiisa waxaa jirto fursad lagu doorto waxbarasho tababarte oo dugsiga sare ah. Taas micnaheedu waa in aad helaysid isku cilmi laakiin ugu yaraan waxbarashadaada barkeed waxaad ku suubineysaa hal meel ama meelo badan oo goob shaqo ah.

## Arrin in lagu fikiro u baahan

Haddii aad rabtid inaa bilaawikartid jaamacadda waxaa muhiim ah in aad qorsheysid waxbarashadaada. Waxbarashada oo qaaska loo doorankaro, iyo haddii ey dugsiga fursadaas ku siinaayaan, waxaa dhigankarta barnaamujka la kordhiyay, oo waxaa markaas akhrisankartaa koorsooyinka aad u baahantahay haddii aad bilaabeysid jaamacad mustaqbalka. Koorsooyinkaas waa labo oo waxey kala jihiin koorsada iswiidhishka ama iswiidhishka oo luuqadda labaad iyo koorsada ingiriiska. Fadlan la xriiri shaqaalaha xirfadaha iyo waxbarashada haddii aad rabtid inaa jaamacad dhigatid mustaqbalka.

Adiga waxaa markasto xaq u leedahay inaa doorankartid koorsada ciyaaraha iyo caafimaadka iyo koorsada bilic oo kamid ah koorsada oo doorashada gaarka ah.